## Dookha Xog-ogaalka loo yahay



*Waxaan dooneynaa in aan kaa caawino gaaridda yoolashaada shaqo. Haddii aad qabto walaacyo ku saabsan adeegyadaada DVR, waxaa jira siyaabo dhowr ah oo caawimaad lagu helo.*

### Caawimaada

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo tallaabooyinka buugyarahan ku jira, fadlan naga la soo xiriir 1-800-637-5627 ama Washington Relay: 711

Haddii aad u baahan tahay gargaar ama adeeg dheeraad ah oo loogu talagalay war-isgaarsiinta taabogalka ah, fadlan la xiriir: dvr.languageaccess@dshs.wa.gov.

Haddii aad u baahan tahay martigelin ama wax-ka-beddelka siyaasadaha ama habraacyada si aad uga qaybgasho barnaamij, adeeg, ama waxqabadka DSHS, fadlan kala xiriir isuduwaha ADA ee DVR emailkan dvradacoordinator@dshs.wa.gov.

**Codso Dhageysi Caddaalad ah**

**Cabasho Soo Gudbi**


**Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington**
**Qaybta Tababbarada Farsamo iyo Kuwa Mihnadeed**
**PO Box 45340 • Olympia, WA 98504-5340**
**1-800-637-5627**
**Adeegga War-Gudbinta ee Washington: 711**
**dvrcsr@dshs.wa.gov**
**www.dshs.wa.gov/dvr**

***Bixinaysay Adeegyada Baxnaaninta Xirfadeed Tan iyo 1933***

Maaliyadaha gobolka iyo kuwa federaalka ayaa loo adeegsadaa bixinta adeegyada DVR. Barnaamijka VR wuxuu qiyaastii helaa boqolkiiba 78 oo Maaliyadaha federaalka ah iyo boqolkiiba 22 oo maaliyadaha gobolka ah. Si aad u hesho macluumaadka faahfaahsan ee qaddarka lacagta maaliyadaha federaalka ee barnaamijka loogu talagalay, fadlan booqo https://rsa.ed.gov/fiscal/grant-awards..



# Xuquuqahaaga sida Ka-qaybgalaha DVR



DSHS
WASHINGTON STATE
Department of Social and Health Services

# Dooro ikhtiyaarada sida ugu wanaagsan kuugu shaqeeyo:



### La Hadal DVR

Waxaan kugu dhiirrigelinayaa in aad La-taliyahaaga Baxnaaninta Xirfadeed kala hadasho walaacyadaada iyo ficillada la qaaday ama go'aamada laga sameeyay kiiskaaga. Tani waxaa ay gacan ka geysan karta sii wanaajinta xiriirka aad la leedahay La-Taliyahaaga VR.

### Caawimaad Weyddiiso

La xiriir La-taliyahaaga Baxnaaninta Xirfadeed, Kormeeraha, Maamulaha Gobolka, Maamulaha Dhageysiyada Cadaaladda ah iyo Arrimaha Dadweynaha, ama Agaasimaha DVR.

### Codso Kiis Dib-u-eegis

Waxaad codsan kartaa codsiga kiiskaaga adiga oo la xiriiraya La-taliyahaaga Baxnaaninta Xirfadeed, Kormeeraha Baxnaaninta Xirfadeed, Maamulaha Gobolka ama Maamulaha Dhageysiyada Cadaaladda ah iyo Arrimaha Dadweynaha.



### La-xiriir Barnaamijka Caawimaadda Macmiilka

CAP waa barnaamij ka caawiya dadka walaacyada qaba adeegyadooda DVR. Waxaad la xiriiri kartaa CAP adiga oo:

- Iimaylka: washingtoncap2@gmail.com
- Wacaya ama farriin u diraya: 206-849-2939

### Codso Xeerka Ka-reebban

Waxaad weyddiisan kartaa in lagaa reebo xeerka adiga oo codsi u qoraya La-taliyahaaga VR ama Kormeerahaaga VR. Codsigaaga, u sharrax heerka aad weyddiisanayso in wax laga qabto, sababta aad u weyddiisanayso ka-reebnaanta, iyo inta aad ka-reebnaanta u baahan tahay.

### Codso Dhexdhexaadin

Dhexdhexaadintu waa hannaan iskaaga ah oo lagu xalliyo dhibaatooyinka laga la kulmo DVR iyada oo caawimaad laga helay dhexdhexaadiye:

- Adiga iyo wakiilka DVR waa in aad ku heshiisaan dhexdhexaadinta.
- Dhexdhexaadiyaha wuxuu dhageystaa labada dhinac wuxuunna gacan ka geystaa helidda xal cadaalad ah.
- Waxaad weli heli kartaa xuquuqaha dhageysiga cadaaladda ah.

Si aad wax badan uga oggaato, la hadal la-taliyahaaga DVR, Kormeeraha VR, Maamulaha Gobolka ama Maamulaha Dhageysiga Cadaaladda ah iyo Arrimaha Dadweynaha.

### Cabasho Soo Gudbi

La xiriir DVR haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo xallinta walaacyada ama soo gudbinta cabasho. Tan waxaad ku samayn kartaa:

- Buuxinta foomka internetka: www.dshs.wa.gov/contact-department-social-and-health-services
- Wacaya: 1-800-637-5627

### Codso Dhageysi Caddaalad ah

Haddii aadan oggolayn go'aanka ku saabsan adeegyadaada DVR, waxaad weyddiisan kartaa dhageysi cadaalad ah. Waa in aad dhageysiga codsataa 45 maalmood gudahooda laga soo bilaabo taariikhda warqadda aad ka heshay La-taliyaha DVR. Dhageysiga wuxuu dhici doonnaa 60 maalmood gudahooda ka-dib marka Xafiiska Dhageysiyada Maamulka uu codsigaaga helo.

**Ogow:** Dhageysiyada Cadaaladda ah waxaa loogu talagalay arrimo gaar ah sida ansixinta, diidmada, xaq-u-yeelashada, isbeddellada ama joojinta adeegyada. Loogu ma talagalin cabashooyin guud oo ku saabsan DVR ama shaqaalaha DVR.

Si aad ugu soo gudbiso Dhageysi Cadaalad ah Xafiiska Dhageysiyada Maamulka La Xiriira:

- Foom Barta Internetka ah: oah.wa.gov/resources/forms/hearing-request-public-assistance-form
- Wac: 1-800-583-8271

### Sida loo soo gudbiyo Cabasho Takoor

Haddii aad aaminsan tahay in DSHS ay kugu takoortay sababo la xiriira naafonimadaada, waxaad cabasho u soo gudbin kartaa Qaybta Xiriirrada Shaqaalaha DSHS:

- Wac Telefoonka Lacag La'aanta ah: 1-800-737-0617 ikhtiyaarka 5
- Iimaylka:: IRAUcomplaints@dshs.wa.gov